

# Barnaamijka Carruurta Ka Xorta ah Sunta SIYAABAHA AY KU SOO GAARI KARAAN KIIMIKOOYINKA AY SUURTAGALKA TAHAY IN AY LEEYIHIIN WAXYEELEEYO



## Soo gaarista Maqaarka (dubka)

Qaar ka mid ah alaabta daryeelka shakhsiyeed iyo waxyaalaha la isku qurxiyo ayaa waxaa ku jira phthalates iyo biro u horseedi kara in ay maqaarka/dubka soo gaaraan.

## Soo gaarista kiimikada

Soo gaarista kiimikadu waxay ka iman kartaa isticmaalka alaabada sida alaabta alwaax isku dhafka/macmalka ah, kaas oo laga yaabo inuu ku jiro formaldehyde oo laga helo xabagta iyo koolada.

## Neefsashada (neefsashada)

Alaabta nadiifinta guriga waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan phthalates, kuwaas oo loo isticmaalo carrafta udgoon.

## Liqitaanka (cunista iyo cabbidda)

Kiimikooyinku waxay ka bixi kara alaabta guriga waxayna ku degi karaan boodhka/dhaska. Dhaqdhaqaaqa gacanta iyo afka ah awgeed carruurta waxay liqi karaan dhaska ay ku jiraan kiimikooyinkani.

## Sida loo yareeyo soo gaarista kiimikooyinkan

- Gurigaaga faakuum ku nadiifi oo isticmaal maro qoyan si aad boodhka/daska uga nadiifiso meelaha dushooda. Kiimikooyinka ka yimid alaabooyinka qaarkood ayaa waxay ku degi karaan dhaska guriga.
- Ka hubi calaamadaynta (labels) alaabta si aad uga fogaato kiimikooyinka aad ka welwelsan tahay oo soo iibso badeecooyin lagu sameeyay kiimikooyin ammaan ah.
- Haddii ay suurtagal tahay, iska saar oo tuur alaabta guriga ( masaasadaha duugoobay ee ilmaha, alaabta guriga, qalabka elektarooniga ah) ee la ogyahay in lagu sameeyey Kiimikooyinka Mudnaanta leh iyo Kiimikooyinka Welwelka Sare laga Qabo.

## Baro wax badan oo ku saabsan Kiimikooyinka Mudnaanta leh iyo Kiimikooyinka Welwelka Sare laga Qabo

Iskaan garayso QR koodhka si aad wax badan uga ogaato barnaamijka iyo shaqada la qabanayo.



## Toxic Free Kids Program

651-201-4899 | [health.risk@state.mn.us](mailto:health.risk@state.mn.us)  
[www.health.mn.gov/communities/environment/  
childenvhealth/tfka/index.html](http://www.health.mn.gov/communities/environment/childenvhealth/tfka/index.html)